

**Ujeedada:** Sharraxaa Xulashooyinka OR PTC DCI EVV oo kugu caawin doonaa adiga inaad xulasho doorato taasoo gaarsiisan heerka isku hubida teknoolojiyada.

**Natiijada:** Isticmaaleyaasha ayaa garanaya sida loo xusho habka EVV ee ku salaysan heerkooda isku hubida teknoolojiyada.

## Heerka Isku Hubida Teknoolojiyada

### Isku hubid



### Nooca isku hubida



### Aan isku hubin



## Muxuu yahay?

### Barnaamijka/app-ka taleefanka gacanta OR PTC DCI

Barnaamijyada ama apps-ka taleefanka gacanta ee qarash la'aanta ah ama bilaashka ee loo isticmaalo Android ama aalada casriga ah ee iOS.

## Maxaa la iiga baahan yahay inaan sameeyo?

**Bixiyaha:** Isticmaalka app-ka bilowga waqtiga iyo dhammaadka waqtiga bilowga iyo dhammaadka shifti kasta.

**Macaamiil:** Uma baahna in uu isticmaalo app-ka. Wuxuu ka bixi karaa shiftiga bixiyaha asagoo qoraya PIN-ka/baaswaadhka ama saxiix elektaroonig ah, haddii uu doono.

### OR PTC DCI Fob

Aalad yar oo si sugan loogu xafiday guriga macmiilka ee adeegyada lasiiyo.

**Bixiyaha:** Ayaa diiwaangaliya maalin waliba koodhadhka fob. Wuxuu ku qoraa koodhadhka fob Boortalka Mareegta OR PTC DCI dhammaadka waqtiga qarash bixinta.

**Macaamiil:** Loogama baahna wax tillaabo ah inay macaamiishu qaadaan.

### Khadkalaanlaynka ee OR PTC DCI

Isticmaal taleefanka laanlaynka ah ee yaala guriga macmiilka ee adeegyada la siiyo.

**Bixiyaha:** Isticmaal laanlaynka macmiilka adigoo ka wacaaya 844 nambarka ah bilowgaba iyo dhammaadka shifti kasta.

**Macaamiil:** Waxaa kaliya oo uu u baahan yahay tillaabo ka socota macmiilka oo uu ku qoraayo PIN-ka asagoo isticmaalaya taleefanka taasoo loogu tala galay waxyaabo la qoray mar hore.

**Fiiro gaar ah:** Haddii aad tafatir samaynayso, waxaad u baahan doontaa inaad isticmaasho bogga ama Boortalka Mareegta OR PTC DCI (oo laga gali karo kombuyuutar, laabtob, ama web browser kujira aalad casri ah).

**Fiiro gaar ah:** Haddii taleefan laanlayn ah uusan lahayn macmiilku, uga fakar fob sidii xulasho haddii aadan isku hubin isticmaalka teknooliyada.